# HAGAHA WAALIDKA EE MACLUUMAADKA ARDAYGA ALT ELPA

## SIDEE AYUU AHAA WAXQABADKA ILMAHAYGA EE GUUDMARKA ALT ELPA EE SANADKAN?

Kadib marka aad gayso **Qiimaynta Aqoonta Luuqada Ingiriisiga ee Kale (Alternate English Language Proficiency Assessment (Alt ELPA))**, ilmahaaga waxaa la siin doonaa **Warbixinta Ardayga ee Shakhsi Ahaaneed (Individual Student Report (ISR))** oo ay la socdaan eegitaanka aqoonta iyo sadexda nooc ee dhibcaha miisaanka tirada. Tilmaamahan waxay sharaxayaan eegitaanka aqoonta iyo dhibcaha miisaanka tirada iyo hagaha bixinta ee nooca taageerada luuqada ee ilmahaagu u baahan yahay sanadka xiga.

### Eegitaanka Aqoonta

Sanduuqa hoose waxa uu sharaxayaa heerarka aqoonta ee luuqada Ingiriiska-tani waxaa weeye eegitaanka aqoonta ilmahaaga. Dhibcahan waxa uu ku salaysan yahay dhubcaha miisaanka guud, sharaxa hoose, iyo heerka fasalka ilmahaaga.

**Eegitaanka Aqoonta**

**Aqoonta -** Ardayda waxay muujinayaan heerka aqoonta luuqada Ingiriisga ee ka muuqata heerarka Ikhtiyaarka Kale ee ELP ee suurto gelinaysa ka qayb galka buuxa ama xadidaada yar ee ka qayb galka dhaqan gelinta fasalka ku haboon ee hawlaha muujinaya heerarka Aqoonta Ikhtiyaarka Kale. Tani waxaa lagu sheegey Alt ELPA inay tahay tobobarka Heerka 3 ama ka sareeya dhamaan qaababka. Marka Aqoonta la geliyo Alt ELPA, ardayda waxaa lagu samayn doonaa dib u kala saarid.

**Hormarka -** Ardayda waxay muujinayaan heerka aqoonta luuqada Ingiriisga ee ka muuqata heerarka Ikhtiyaarka Kale ee ELP ee keeneysan ka qayb galka xadidan ee ka qayb galka dhaqan gelinta fasalka ku haboon ee hawlaha muujinaya heerarka Aqoonta Ikhtiyaarka Kale. Tani waxaa lagu sheegey Alt ELPA inay tahay tobobarka ka sareeya Heerka 1 iyo ka sareeya Heerka 3 ugu yaraan hal qaab. Dhibcaha ardayda ee Hormarka ku yaala Alt ELPA waxay u qalmaan taageerada barnaamijka ee joogtada ah.

**Soo Baxaya -** Ardayda waxay muujinayaan heerka aqoonta luuqada Ingiriisga ee ka muuqata heerarka Ikhtiyaarka Kale ee ELP ee keeneysan xadidaad aad u wayn ee ka qayb galka dhaqan gelinta fasalka ku haboon ee hawlaha muujinaya heerarka Aqoonta Ikhtiyaarka Kale. Tani waxaa lagu sheegey Alt ELPA inay tahay tobobarka Heerka 1 dhamaan qaababka. Dhibcaha ardayda ee Soo Baxaya ku yaala Alt ELPA waxay u qalmaan taageerada barnaamijka ee joogtada ah.

### Dhibcaha Miisaanka Guud

**Dhibcaha Miisaanka Guud:** 150

Tani waxaa weeye miisaan 3-god ah oo ku salaysan sida uu yahay waxqabadka guud ee ilmahaaga miisaanka Alt ELPA. Xisaabinta waxaa kamid ah natiijada waxqabadka ee dhamaan afarta qeybood (Hadalka, Qoraalka, Dhagaysiga, Akhriska). Haddii ilmahaaga laga dhaafay qayb, Dhibcaha Miisaanka Guud waxaa lagu xisaabiyaa wax ku salasyan natiijooyinka kaliya hal aag oo lagu qoray ilmahaaga.

### Dhibcaha Miisaanka Dhamaystiran

**Dhibcaha Miisaanka Dhamaystiran:** 165

Dhibcaha Miisaanka Dhamaystiran waxaa uu ku yaalaa Warbixinta Ardayga ee Shakhsi Ahaaneed oo waxa uu ku xigaa Dhbcaha Miisaanka Guud. Dhincaha sidoo kale waxaa weeye dhicabaha miisaanka 3-god. Waxay matalaysaa siday tahay aqoonta Ingiriisga ilmahaaga iyada oo laga duulayo hormarka Dhagaysiga iyo Akhriska ee Alt ELPA, Haddii ilmahaaga laga dhaagay aaga aqoonta (Dhagaysiga iyo Akhriska), dhibcaha waxaa lagu xisaabin doonaa kaliya aaga lagu qoray ilmahaaga.

## SIDEE NATIIJADAN LOO ADEEGSAN KARAA?

Natiijooyinka waxaa loo adeegsan doonaa, iyada oo la raacinayo macluumaadka kale, si ay uga caawiyaan macalimiinta aqoonsiga ardayda ee u baahan taageerada dheeraadka ah ee aaga luuqad kasta. habaynta dhibcaha iyo aaga ee ardayda shakhsi ahaaneed waxay sheegi karaan aaga uu ku xoogan yahay iyo aaga uu uga baahan yahay taageerada/tilmaamaha dheeraadka ah oo waxay bixin kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tilmaamaha waxbarashada. Macluumaadka sidoo kale waxaa loo adeegsan doonaa in lagu cabiro sida dugsiyada iyo nidaamka dugsiga uu gacan uga gaysanayo ardayda Ingiriisiga ee qaba laxaad la'aanta aqoonta ee aadka u wayn ee ka baajinaya inay gaadhaan waxa looga fadhiyay.



© 2023 Regents of the University of California

Alt ELPA Alternate English Language Proficiency Assessment

## Dhibcaha Miisaanka Qaabaynta/Aaga

Shaxdan hoose waxay sheegeysaa waxa heer kasta oo wax qabad looga fadhiyo marka la eego sida ilmahaagu u buuxiyo filashooyinka in fasalka iyo aaga (Dhagaysiga, Akhriska, Hadalka, Qoraalka). Dhibcaha sidoo kale waxay shaxaraaan weedhaha wax ka bedelka (Wax soo saarka = Hadalka iyo Qoraalka, Fahanka = Dhagaysiga iyo Akhriska). Sharaxa Heerka Wax Qabadku waxa uu sharaxayaa wax ka bedel kasta iyo waxqabadka loga fadhiyo ilmaaaga taas oo ku salaysan natiijooyinka Alt ELPA.

**Afarta aaga ee qeybood, waxaa jira afar waxqabad (1–4).**

1 **Bilawga** 2 **Ku meel gaadh** 3 **Hormarka Hore** 4 **Hormarka**

| Waxka Qabadka/Aaga | Dhibcaha Miisaanka | Waxka Qabadka | Sharaxa Heerka Waxqabadka |
|---|---|---|---|
| **1. Qaabaynta: Wax Soo Saarka (Ku Hadalka iyo Qoraalka)** | **40** | 4 | **Waxsoo Saarka Heerka 4: Cabirka qaabaynta Waxqabadka ee aqoonta luuqada Ingiriisga ee Ku Hadalka iyo Qoraalka. Ardayda Heerka 4ee waxqabadka Hormarka muujisay ee ka muuqata heerarka Ikhtiyaarka Kale ee ELP ee si buuxda uga qayb geli kara fasalka ku haboon ee hawlaha muujinaya heerarka Aqoonta Ikhtiyaarka Kale.** |
| **1a. Aaga: Ku Hadalka** | **50** | 4 | **Ardayda Heerka 4 ee xakamaynta madaxa banaan, wax sheega, iyo taageerada waxaa:**<br>• **Waxay bixiyeen bandhig ama macluumaad gaaban (sida, wixii ku saabsan mawduucyada iyo sheekooyinka, sheekooyinka gaagaaban, khibradaha ama dhacdooyinka ay yaqaanaan)**<br>• **Waxay bixiyaan dhawr sababood oo macluumaadka taageero ama doorbitaan ku saabsan mawduucyada ama sheekada ay yaqaanaan.**<br>• **Isticmaalka tirada korodhay ee kamadaha, codadka, wax sheega, iyo qaabka jidhka marka loo eego dad la macaamilka iyo waxbarashada (sida, garoonka, fasalka)**<br>• **Ka qayb galka wada sheekeysiga gaaban** |
| **1b. Aaga: Qoraalka** | **70** | 4 | **Ardayda Heerka 4 ee xakamaynta madaxa banaan, wax sheega, iyo taageerada waxaa:**<br>• **Diyaarinta qoraalka gaaban ee ku saabsan qoraalada, mawduucyada, khibradaha ama dhacdooyinka la yaqaan**<br>• **Bixinta dhawr sababood oo lagu taageerayo macluumaadka ku saabsan mawuucyada iyo sheekooyinka la yaqaan**<br>• **Isticmaalka tirada korodhay ee kamadaha, codadka, wax sheega, iyo qaabka jidhka marka loo eego dad la macaamilka iyo waxbarashada (sida, garoonka, fasalka)**<br>• **Waydiinta iyo ka jawaabida su'aalaha fudud ee la isku waydaarsado fikirada ama macluumaadka, ama bayaaminta si wax loo fahmo** |
| **2. Qaabaynta: Fahanka (Dhagaysiga iyo Akhriska)** | **60** | 4 | **Fahanka Heerka 4: Cabirka qaabaynta Fahanka ee aqoonta luuqada Ingiriisga ee Dhagaysiga iyo Akhriska. Ardayda Heerka 4ee waxqabadka Fahanka muujisay ee ka muuqata heerarka Ikhtiyaarka Kale ee ELP ee si buuxda uga qayb geli kara fasalka ku haboon ee hawlaha muujinaya heerarka waxbarashada ee Kale.** |
| **2a. Aaga: Dhagaysiga** | **80** | 4 | **Ardayga Heerka 4 caadiyan waxay muujin karaan dhamaystirka:**<br>• **Iyada oo sheegaya fikirka ama barnaamijka guud iyaga oo kor u akhrinaya iyo bandhiga afka**<br>• **Ogaanshaha faahfaahinta qaar ee lagu xoojinayo fikirka ama barnaamijka guud iyaga oo kor u akhrinaya iyo bandhiga afka**<br>• **Dib ugu soo celnta qaybaha sheekada iyada oo kor loo akhrinayo iyo afka lagu sheegayo**<br>• **Sheegitaanka macnayaasha kalmado sii kordhaya oo aqoonta guud iyo mawduucyo gaar ah iyo korodh tirada wax sheeg ee mawduucyo, khirbado, ama dhacdooyin kala duwan.** |
| **2b. Aaga: Akhriska** | **90** | 4 | **Ardayga Heerka 4 caadiyan waxay muujin karaan dhamaystirka:**<br>• **Sheegitaanka fikirkaga ama barnaamijka guud iyada oo la eegayo qoraal qoran oo fudud**<br>• **Ogaanshaha faahfaahinta qaar ee lagu xoojinayo fikirka ama barnaamijka guud ee qoraal fudud oo qoran**<br>• **Dib uga sheekeynta sheego ku taal qoraal qoran oo fudud**<br>• **Sheegitaanka macnayaasha aqoonta guud iyo mawduucyo gaar ah iyo korodh tirada wax sheeg qoraalka ku jira ee mawduucyo, khirbado, ama dhacdooyin kala duwan.** |



Waalid ahaan, waxa aad isticmaali kartaa natiijada imtixaanka si uu kuugu hago wada hadalka macalinta ardaygaaga wixii taageero dheeraad ah ee aad ugu baahan karto fasalka iyo guriga.

## WAA KUWAN WAXOOGAA SU'AALO TUSAALAYAAL AH OO AAD WAYDIIN KARTO MARKA AAD KALA HADLAYSO NATIIJOOYINKA MACALINKA ILMAHAAGA:

→ Muxuu ilmahaygu ku wanaagsan yahay, oo halkee ayuu u baahan yahay hormar?
→ Maxaa lagu samayn karaa fasalka dhaxdiisa si hormar loogu sameeyo aaga ilmahaagu uu ku liito?
→ Maxaa la samayn karaa si ilmahaaga loogu cariyo aaga uu ilmahaygu muujiyan wax ku dhaw aqoonta ugu saraysa?
→ Sidee ayaan gacan uga gaysan karaa aqoonta luuqada ilmahayga ee guriga?
→ Sidee ayaan u xaqiijin karaa in ilmahaygu uu sii wado hormarka?



© 2023 Regents of the University of California

Alt ELPA
Alternate English Language Proficiency Assessment